
TIERPS KOMMUN

# Warbixin loogu talagalay qofka adigo kale ah oo ku talo jiro in uu codsado Taageero-dhaqaaleed




**Goobta lagu qaabilo codsiyada Taageero-dhaqaaleed yada**

Degmada Tierp waxaa ku yaalo goob lagu qaabilo dadyoowga ku talo jiro in ay codsadaan Taageero-dhaqaaleed. Waa kuwa aan weli waaxda ka codsan Taageero-dhaqaaleed.

Goobta qaabilaadda waxaa ka hawlgala xoghayaha ammuuraha adeegga bulshada. Qofkii u baahan ku saabsan goorta uu Taageero-dhaqaaleedka codsan karo, wuxuu waxda kala xiriiri karaa khadka taleefanka.

Goobta qaabilaadda waxaa khadka taleefanka lagala xiriiri karaa isniin-jimce, ka reeban maalmaha arbacada, saacadaha 09:00 – 10:00 waa  Lambarka talefanka waa 0293-21 82 01.

**Taageero-dhaqaaleed [Ekonomiskt bistånd]**

Qofka aan awoodin in uu is-biilo ama qoyska aan dhaqaale ahaan isku filnayn, wuxuu codsan karaa Taageero-dhaqaaleed. Da`yarka oo weli dhigta dugsi sare waxay mas`uuliyadiisa biilka saaran tahay waalidiintiisa. Ardayda iyo ganacsateyaasha guud ahaan xaq kuma laha qaadashada Taageero-dhaqaaleedka.

Waa kaalmo gaar ahaan qofka loogu talagalay oona gaar ahaan looga arrinsado, waxayna ku salaysan tahay Heer-qarmeedka noolasha dalka Iswiidan.

Go`aan kasta oo ku saabsan Taageero-dhaqaaleedka gaar ahaan ayaa loo gaara loona qiimeeyaa, wuxuuna ku salaysan yahay xiriir-shaqsiyeed u qofku la lahaa qof gacan-haye ah. Markii qofku u codsado Taageero-dhaqaaleedka wuxuu Maamulka adeegga bulshada ku dhaqaaqa xaalad-baarista.

Ka arrinsashada xaq u yeelanshada Taageero-dhaqaaleedka , waxay bilaabataa maalinta Maamulka adeegga bulshada u codsiga helo. Taageero-dhaqaaleed caadi ahaan looma bixiyo iyadoo laga soo xisaabiyo bilihii la soo dhaafay.

Macnaha soo gudbinta codsiga Taageero-dhaqaaleed ma ahan in qofku u xaq ku leeyahay wax lacag ah. Macneheedu waxay tahay in xaalad-baarista ay bilaabanayso, iyo qiimaynta haddii aad xaq u leedahay Taageero-dhaqaaleedka iyo in kale.

Warbixin loogu talagalay qofka markii ugu horeeysay u codsanayo Taageero-dhaqaaleed

**Haddii aad shaqo-laawe tahay**
Haddii aad shaqo-laawe tahay waa inaad Xafiiska Shaqada iska diiwan gelisa oona hab firfircoon shaqo u raadsata. Mar kasta oo aad Taageero-dhaqaaleedka codsato, waa inaad na wargelisa shaqooyinkii aad raadsatay, taasoo aad nagu wargelin karto adigoo codsiga ku soo lifaaqo tusaale [aktivitetsrapport] ama [jobbsökarlista].

**Haddii aad xannuunsan tahay**
Haddii aad xannuunsan tahay, oona aad heegan u ahayn suuqa shaqada waa inaad jirro isku qorta oona caddayn ka haysata qof dhakhtar ah.

**Haddii aad qaadatay fasaxa waalidiinta [föräldraledig]**
Haddii aad qaadatay fasaxa waalidiinta, waa inaad xilliga aad codsatay Taageero-dhaqaaleedka , 7 maalmood toddobaadkii qaadato lacagta loo yaqaanno [föräldrapenning] oo ah heerka lacagta jirrada [sjukpenning]. Waa inaad daahid la`aan kahor inta u ubadkaaga buuxsan hal sano, aad boos ka codsato xannaanadda oona aad bilaawday shaqo raadsasho.

**Haddii aad waxbarato**
Haddii aad waxbarato waxaad dhaqaale ka codsan kartaa Guddiga arrimaha waxbarashada [CSN]. Guud ahaan xaq kuma lihid Taageero-dhaqaaleedka haddii aad heer dugsi sare, jaamacad ama kulliyad wax ku barato. Teeda kale, waa inaad daahid la`aan shaqooyinka xilliyada fasaxa dugsiyada aad raadsato, taasoo caadi ahaan ku beegan tiro bilood kahor dhammaadka simisterka.

**Haddii aad hawlgab tahay**
Haddii da`daada ay ka wayn tahay 65 sano oona aad qaadato gunnada hawlgabka aan kugu filnayn, waa inaad la xiriirtaa Hay`adda arrimaha hawlgabyada [Pensionsmyndigheten]. Iyaga ayaa ka codsan kartaa Taageero-dhaqaaleedka arrinta u gaar ah [äldreförsörjningsstöd].

**Xaasaska ama lamaanayaasha isla nool**
Xaasaska ama lamaanayaasha isla nool ama kala nool waa in wadajir ay Taageero-dhaqaaleedka u codsadaan.

**Waa in marka hore aad codsado gunnooyinka iyo taageero-dhaqaaleedyada**
Kahor inta aad codsan Taageero-dhaqaaleed waa inaad baarta fursadda aad ku codsan karto daqliyadaha kale.

Kuwaasoo tusaale noqon karo gunnada Khasnadda caymiska shaqolaaweyaasha, [Alfa-kassa] ama Khasnadda caymiska bulshada.

**Daqliyada ku gaarka ah ama hantiyadaha kale**
Dhammaan daqliyadaha kale iyo hantiyadaha kale waa in nala wargeliyaa markii aad Taageero-dhaqaaleedka codsanayso. Tusaale:

- mushahar
- gunno
- kaalmo-dhaqaaleedka dhaqdhaqaaqa shaqada [aktivitetsstöd]

TIERPS KOMMUN

- taageero-dhaqaaleedka carruurta [barnbidrag]
- taageero-dhaqaaleedka waxbarashada [studiebidrag]
- taageerada masruufka oo Khasnadda caymiska bulshada ay siiyo xilhaayeha xannaanadda/waalidka ee ilmahiisa la nool [underhållsstöd]
- masruufka uu bixiyo waalidka aan ilmahiisa la noolayn [underhållsbidrag]
- taageero-dhaqaaleedka kirada [bostadsbidrag]
- taageero-dhaqaaleedka kirada loogu talagalay hawlgabyada [bostadstillägg]
- gunnada hawlgabka bukaha [sjukersättning]
- gunnada dhaqdhaqaaqa [aktivitetsersättning]
- lacagta bukaanka [sjukpenning]
- lacagta waalidiinta [föräldrapenning]
- taageero-dhaqaaleed daryeelida [vårdbidrag]
- deqda/deynta waxbarashada [studiemedel]
- gunnada hawlgabyada [pension]
- lacagaha canshuur celinta [skatteåterbäring]
- faa`iidooyinka [vinster]
- deeq [gåvor]
- magdhawga caymisyada ay bixiyaan [skadestånd från försäkringsbolag]
- lacagaha akawntiga lagu soo shubay [insättningar på konto]

**Hantida sida baabuurrada iyo hanti ma guurtada**
Xaaladaha qaarkood waxaa suurtagal noqon karto in qofku uu baabuur yeesho, isagoo haddana ku nool Taageero-dhaqaaleed. Laakinse mar kasta gooni ahaan ayaa arrinta loo qiimeeya. Waxaan mararka qaarkood dhacda in qofka lagu yiraahdo waa inaad gaariga iwm iska iibisa. Haddii qofku u qabo hanti ma guurto waxaa dhici karto in lagu yiraahdo iska iibi. Haddii aad haysato hanti hab fudud loo iibin karo, sida tusaale baabuur waxaa qiimahiisa lagu xisaabinayaa daqli ahaan. Haddii aad leedahay hanti ma guurto waxaa lagu siinayaa wakhti aad ku iibiso.

**Iska beddelka guriga**
Haddii aad aqal cusub u guurto kaasoo ka kharash badan kii hore, nidaamka guud wuxuu yahay in lagu xisaabiyo kharashka aqalkii aad ka soo guurtay.

**Lacagaha la kaydsado, hantida ma guuraanka ah, saamiyadaha iyo shirkadaha**
Haddii aad leedahay hanti, nooc kasta ha ahaate waa inaad hantidaas marka hore isku biisha.

**Wixii dheeraad ah**
Markii taageero-dhaqaaleedka aad codsanayso, waxaad mas`uul ka tahay qorshaynta dhaqaalahaaga. Taasoo macneheeda ay tahay; in haddii daqliga ku soo galo u ka badan yahay kan heer-qarmeedka waa inaad lacagtaas aad u kaydsato baahida mustaqbilka awgeed.

**Rafcaan ka qaadashada go`aanada**
Haddii aadan ku qanacsanayn go`aanka Maamulka adeegga bulshada, waxaad xaq ku leedahay inaad rafcaan ka qaadato. Haddii aad u baahan tahay in arrintaas laga caawinno waxaad kala xiriiri kartaa gacan-hayaha adiga ku qaabilsan.

**Wargelinta aan sax ahayn**
Dhammaan dhaqliyada iyo wixii isbedel ah waa in wargelintooda la helaa. Haddii laga shakiyo jiritaanka khiyaanada waxaa khiyaano qaadashada Taageero-dhaqaaleedka la wargelinayaa ciidanka booliska, waxaana dhici karto inaad dib u bixiso lacagihii aad been-abuurka ku qaadatay.

**Codsiyada soo noqnoqda**
Xaaladaas bisha ku xigta awgeed waa inaad markii taariikhda ay ku beegan tahay 15 ilaa 20 bisha, noo soo gudbisaa foomka codsiga oo gebi ahaan aad u buuxsan, kuna qoran warbixin aan qabyo ahayn kuna soo lifaaqda wixii caddaymo ah:
Sida kuwa ku saabsan dhammaan wixii daqli ah iyo kharash ah, cadaymaha aad kirada iyo korontada bishii la soo dhaafay ku bixisay, liiska shaqooyinkii aad codsatay ama caddaynta dhakhtarka haddii aan xannuunsanayd, iyo caddaymaha goobjoogida goobaha aad ku hawlanayd.

Tusaale:
Maanta waa 15 bisha juunyo waxaana rabta inaad codsato Taageero-dhaqaaleedka bisha luulyo. Buuxi foomka kuna qor codsiga bisha luulyo. Na wargeli dhammaan shaqooyinkii aad raadsatay bisha juunyo iyo warbixinada iyo daqliyada bisha juunyo.

**Qofka leh qof gacanhaya ah**
**Saacadaha taleefan soo dirida waa**
Isniin-jimce, ka reeban maalin arbaco, saacadaha 09:00 ilaa 10:00 ayaa taleefan u soo diri kartaa gacanhayaha Taageero-dhaqaaleed adiga ku qaabilsan, markaas ayaa su`aallo arrintaad ku saabsan waydiin kartaa.

**Waaxda Taageero-dhaqaaleed**
Adreeska booqashada waa:
Torggatan 4, Tierp
Taleefan guud: 0293-21 80 OO
Saacadaha ay furan tahay: isniin-jimce 07:30—16:00 (qaabilaadda).
Qaabilaadda waxaa laga hela fursadda in wax laga koobiyeeysto ama laga daabacado.

TIERPS KOMMUN

# Adeegga farsamada elektroonikada ku salaysan [E-tjänst] ee lagu codsado Taageero-dhaqaaleed

**Waxaad Taageero-dhaqaaleedka ku codsan kartaa adigoo adeegsada adeegga farsamada elektroonikada ku salaysan**

Fursadaas waxaa isticmaali karo qofka adigoo kale ah oo imminka qaata Taageero-dhaqaaleedka iyo dadyoowga mar kasta codsada Taageero-dhaqaaleed.

Adiga/idinka waxaad u baahan tihiin:

- Ku bilaabatay qaadashada Taageero-dhaqaaleed iyo in gacan-hayaha ku qaabilsan u ku hirgekliyay adeegga farsamada elektroonikada ku salaysan en
- Aqoonsiga loo yaqaanno [e-legitimation] ama [bank-id]
- Aad rasmi ahaan ka diiwan gashan tahay degmada Tierp
- Kombyuutar, table tama taleefan

Waa inaad ku soo lifaaqda warqadaha aad ku muujinayso warbixinada aad noo soo gudbisay. Koobi ka sameey warqadaha adigoo masawirro ka qaado oo isticmaala kaamerada mobaylka ama ku soo lifaaq iyagoo ah fayl [PDF].

**Ku gudagal adigoo adeegsado aqoonsiga loo yaqaanno [e-legitimation]**

Adiga iyo saygaaga, aafadaada, lamaanahaaga ama qofka ku la nool waa in uu haysto aqoonsiga loo yaqaanno [e-legitimation], maadaama wadajir aad Taageero-dhaqaaleedka u codsanaysaan, oona saxiixiinna loo baahan yahay kaddib markii aad buuxisaan.

Haddii adiga/idinka aad haysan aqoonsiga loo yaqaanno [e-legitimation] waxaad ka codsan kartaan bangiga aad akawntiga ku leedihiin. Warbixin dheeraad oo ku saabsan aqoonsiga noocaas ah waxaad ka aqrisan kartaan barta internetka Hay`adda canshuuraha [Skatteverket]

Adiga/idinka waxaa mas`uul ka tihiin in warbixinada aad soo gudbiseen ay sax yihiin. Waa idinkoo ku dhaqaaqay fal dambiyeed haddii aad warbixin aan sax ahayn soo gudbisaan, waxaana dhici karto in ciidanka booliska la idinku dacweeyo.

**Codsiga farsamada elektroonikada ku salaysan**

Bishii hal mar ayaa Taageero-dhaqaaleedka la codsan karaa iyadoo la adeegsanayo farsamada elektroonikada. Markii codsiga bileed la soo gudbiyo suurtagal ma noqon doonto in codsiyo cusub la soo gudbiyo. Fursada ku xigta waxaa albaabada loo fura 15 maalmood kahor inta ay bilaaban xilliga bisha ku xigta.

Ururso dhammaan warbixinada daqliyada ee codsiga dartiisa loo baahan yahay, kahor inta aad jag-siin xiriiryeha [länken]. Waxaa loo baahan yahay cadaymaha daqliga lagu soo gudbiyay codsiga.